# Qorshe hawleedka Flemington agagaaraha ee 2022–23 aragtida guud

## U gogol xaarida
## La geli karo

**OFFICIAL - RASMI**

Qorshahaani wuxuu wax ka bedelayaa baahiyaha, fikradaha iyo hadafyada **shan jaho oo diirada la saaryo** iyo **63 hawlood**, kuwaas oo loo hirgelin doono **hawlwadaag, - kharajgarayn la wajahay** iyo **xayaysiin**.

Ficilada la dejiyey ee qorshahaan waxay ku salaysan yihiin wixii bulshada ka soo noqday laga bilaabo 2021 - 22.

Qayb kasta oo ka mid ah meelaha la wajahayo, qorshaha ayaa hoosta ka xariiqay:

- **Wixii aan ka maqalnay** deganayaasha ee ku saabsan wixii soo maray.
- **Waxa deganayaashu doonayaan**inay arkaan, baahidooda iyo waxay jeclaan lahaayeen.
- **Waxaan doonayno in aan gaarno**meelahan aan wajahayno. Waxaani waa natiijooyinkii ay carab-baabeen deganayaashu.
- **Sidaan u samayn doono** – ficilada la isku raacay si wax looga qabto baahiyahaas lana hirgeliyo xalal maxali ah wixii mudnaanta leh. Qaar badan oo fikradahaas ah waxaa wada sameeyey deganayaasha. Ficiladaan qaarkood waxay soo bilawdeen Janaayo 2022  Qaarkood waxaa la keeni doonaa iyada oo ay door ka qaadanayaan deganayaasha, ururada bulshada, Golaha iyo qaybaha kale 12 ka bilood ee soo socda.

| Meelaha diirada la saarayo | Hadafyadeena | Ficilada maxaliga ah |
|---|---|---|

Families, Fairness and Housing

| | | |
|---|---|---|
| Wada-xiriirka iyo ka qaybqaadashada | • Deganayaashu aad ayay ugu kalsoon yihiin inay ka qayb qaataan go'aan samaynta<br>• Deganayaashu waxay lug ku lahaayeen go'aana muhiim ah kuwaas oo saameeya guryahooda, deriska iyo adeegyada<br>• Deganayaashu way ka qaybqaataan waxayna leeyihiin xalal xaalladaha ay u arkaan inay yihiin kuwa ugu culus | • Asaas Guddiga Kooxda wax Qabadka<br>• Door ku yeelashada dib-u-qaabaynta go'aanada deganaha xagga go'aan samaynta<br>• Fadhiyo waxbarasho ee sida dawladu u shaqayso ku saabsan<br>• Janalada wada xiriirka cusub<br>• Kor u qaadida doorarka sarkaalka gurisiinta<br>• Deeqaha bulshada, hogaaminta iyo tababarka dawladnimo<br>• Ka qaybgalka golaha xaafada<br>• Horumarinta hogaaminta dhalinyarada<br>• Wada-tashi ka dhexeeya deganayaasha iyo kuwa doorarka qaata<br>• Macluumaad baahinta dhalinyarada<br>• Wax-ka-dhihida iyo sanduukha tala-jeedinta |
| Dayactirka iyo adeega | • Deganayaashu wax badan bay ogyihiin wixii ku saabsan kiraysiga iyo maaraynta deriska<br>• Maaraynta guryaha iyo kiraysiga wax-ka-qabanaysa baahida deganayaasha | • Dayactirka iyo gurisiinta taxanaha waxbarashada<br>• Agabka soo dhowaynta kiraystayaasha cusub<br>• Joogto ugu wareega degaanka<br>• Sahlida macluumaadka gurisiinta<br>• Nadaam gaari dhigasho oo amaana<br>• Qaadista baabuurka la laga tegay<br>• Wanaajinta raacista shuruucda gaari dhigashada<br>• Rakibida biinanka qaadida qashinka<br>• Shirka gurisiinta ijaartayaasha<br>• Kormeeraha amaanka Bulshada<br>• Wanaaji nalaynta iyo amaanka<br>• Wanaaji dhijitaalka iyo codsiyada dayactirka |
| Shaqada iyo waxbarashada | • Deganayaashu waxay si sahlan u helli karaan kaalmada ay u baahan yihiin si ay u hellaan shaqo iyo tababar<br>• Deganayaashu waxay ka heli karaan fursada badan oo shaqo agagaaraha kuwaas oo u dhigma hadafyada mihnadooda, saacadaha la helli karo, helitaanka iyo baahiyaha dhaqanka | • Hawlgeli, sawir oo magacow shaqadaad door bidayso<br>• Ganacsiyada yaryar iyo kaalmada hal-abuurka<br>• Hor-umari oo hirgeli qorshaha shaqo ee bartilmaameedka ah<br>• Kor u qaad helitaanka shaqada<br>• Caawin da'daalada shaqada ee deganayaasha<br>• Caawin dadka dhalinta yar inay hellaan shaqadoodii ugu koowaad |

| | | |
|---|---|---|
| Amaanka, caafimaadka iyo samaqabka | • Waxaa jira wada-xiriir wanaagsan oo u dhexeeya adeegyada<br>• Deganayaasha iyo adeegyadu wadajir ayay u shaqeeyaan si ay u wax uga qabtaan baahida deganayaasha<br>• Deganayaashu waxay awoodaan heli karaan adeega saxda ah waqtiga saxda ah | • Barnaamijka wacgelinta caafimaadka<br>• Barnaamijka caafimaadka dhimirka<br>• Caafimaadka iyo nashaadka samaqabka<br>• Fadhiyada macluumaadka caafimaadka<br>• Kaalmaynta dadka waayeelka ah<br>• U helida carruurta barnaamijyada cayaaraha<br>• Muuji korna u qaad adeegyada maxaliga ah<br>• Bandhiga adeegyada<br>• Caafimaadka dumarka iyo ka warhaynta amaanka<br>• Dabaal ku haboon dhaqanka<br>• Shirka amaanka bulshada<br>• Aqoonta sharciga iyo kaalmada<br>• Xarun dhalinyaro iyo barnaamijyada dhalinyarada<br>• Nashaadka carruurta ee dugsiga ka dib<br>• Kooxaha wada-cayaareedka socod baradka<br>• Kaalmada waalidiinta<br>• Aqoon-siweydaarsiga dhaqaalaha |
| Isku-xirnaanta bulshada iyo goobaha | • Goobaha la wadaago ayaa si fiican loo maareeyey si ay uga faa'iidaystaan deganayaashu<br>• Deganayaashu waxay samaysteen isku xirnaan bulsho, iyaga oo abuuraya bulsho xoogan | • Wanaaji helitaanka qolka bulshada<br>• casriyeynta tas-hiilaadka ama goobaha bulshada<br>• Casriyeynta goobaha cayaarta ee u dhow 120 Racecourse Road<br>• Fariisiga dibada iyo harka<br>• Wanaajinta goobta kubbada kolayga<br>• Xarunta dhalinyarada<br>• Kaalmada xarakaadka deganaha<br>• Baaskiil dhigasho amaana<br>• Kor u qaadida dhaqamada kala duwan iyo deeqaha kale ee bulshada<br>• Barnaamijka deeqaha bulshada ee PTWF<br>• Maalmaha dabaaldega bulshada<br>• Sheeka xariirta dadka kala da'da ah dhexdooda<br>• Barnaamijyada amaanka cuntada<br>• Farshaxanka bulshada<br>• Shabakadaha kooxda bulshada<br>• Dibad ubaxida bulshada<br>• Fasalada cunta-karinta ee carruurta |

Macluumaadka intaas ka badan oo ku saabsan PTWF Flemington ama in laga hadlo nooc kasta oo ah qorshaha, fadlan email ugu dir kooxda PTWF <pavingthewayforwardNMF@dhhs.vic.gov.au>.

Si aad ugu hesho dukumintigaan qaab kale, email u dir kooxda Paving the Way Forward team <PavingTheWayForwardNMF@dhhs.vic.gov.au>.

Waxaa ansixisay Xukuumada Fiktooriya, 1 Treasury Place, Melbourne.

Hore wada ugu xaarida (PTWF) waa da'daal xukuumadeed oo ay kaalmaysay Wasaarada Qoysaska, Cadaalada iyo Gurisiinta. Iyada oo wada shaqayn la leh cohealth, North Melbourne Language and Learning, Drummond Street, iyo Mission Australia.

© Dawlad Goboleedka Victoria, Australia, Wasaarada Qoysaska, Xaqsoorka iyo Gurisiinta, Oktobar 2022.

ISBN 978-1-76130-042-4 (pdf/online/MS word)

Waxaa laga helaa Paving The Way Forward Initiative <https://www.dffh.vic.gov.au/paving-way-forward-initiative>